THE EDUCATION STATE

SCHOOLS

# QORSHAHA ARIMAHA GAARKA AH EE DUGSIYADA

# SU'AALAHA BADANAA LAYS WEYDIIYO EE - WAALIDIINTA LOOGU TALAGALAY

Qorshaha Arimaha gaarka ah ee Dugsiyadu wuxuu wargelinayaa bulshada dugsiga in macluumaadka ku saabsan ardeyda la wadaagi karo si loo fuliyo shaqooyinka ugu waaweyn ee dugsiga ee taageerida iyo waxbarida ardeydeena.

Qorshaha Arimaha gaarka ah ee Dugsiyada wuxuu dejiyaa qaab ah 'baahida ogaansha' oo cad, halkaas oo shaqaalaha dugsigu la wadaagaan macluumaad ku saabsan ardeyda shaqaalaha kale ee doonaya inay ogaadaan ka qayb ahaan doorkooda. Tani waxay waafaqsan tahay sharciga arimaha gaarka ah ee Victoria.

## Qorshahani yuu khuseeyaa?

Qorshuhu wuxuu khuseeyaa dhammaan bartamaha, qaybaha iyo shaqaalaha dugsiga oo ay ku jiraan maamulaha, macalimiinta, macalimiinta soo booqanaya, shaqaalaha bulshada, shaqaalaha fiyoobaanta, shaqaalaha dhalinyarada, kalkaalisooyinka, saraakiisha adeega taageerada ardeyga (SSSOs) iyo dhammaan mihnadlayaasha caafimaadka la xiriira ee kale. Tan micnaheedu waa qaabka hoose oo kale ee 'u baahan inay ogaadaan' sidoo kale waxay khuseysaa dhammaan shaqaalaha dugsiga, haddii ay yihiin shaqaale ama adeeg bixiyayaal ( qandaraaslayaal) iyo wakiilo ( haddii ay yihiin mushaare ama mushaar la'aan) ee Wasaaradda.

## Ma u baahan tahay inaad ogaatid

Dhaammaan shaqaalaha dugsigu waxay awoodaan, waana ku khasab, inay la wadaagaan macluumaadka ku saabsan ardeyga shaqaalaha kale ee 'u baahan inay ogaadaan' macluumaadkaas si uu dugsiga awood ugu siiyo:

1. **Inay wax baraan** ardeyga (oo ay ku jirto in la qorsheeyo baahida shakhsiga ama laga hadlo waxyaalaha hortaagan waxbarashada)

2. **Inay taageeraan** fiyoobaanka iyo caafimaadka maskaxeed iyo bulshadeed ee ardeyga

3. Fuli waajibaadka **sharciga**, oo ay ku jiraan:

    - Qaad talaabooyin macquul ah si loo yareeyo khatarta dhibka sida macquulka ah loo arko ee ardeyga, ardeyda kale, shaqaalaha ama dadka booqashada ah (waajibaadka daryeel)

    - Ku samee isbedelo macquul ah iinta ardeyga (sharciga midab kala sooca)

    - Sii goob shaqo oo ammaan iyo nabadgelyoba leh (sharciga ammaanka iyo caafimaadka ee mihnada).

## Yaa go'aaminaya cidda 'u baahan inay ogaadaan'?

Iyadoo ku xiran tilmaamaha maamulaha, xubin kasta oo shaqaalaha ka mid ah, waxay go'aamiyaan yaa u baahan inay ogaadaan macluumaadkooda khaaska ah ee

VICTORIA State Government | Education and Training

khuseeya kuna saabsan ardeyga, oo ku saleysan qaabka ' u baahan inay ogaadaan'.

La wadaagida macluumaadka khuseeya shaqaalaha kale ee 'u baahan inay ogaadaan' aad ayuu uga duwan yahay xan ama wada sheekaysi shaqa la'aan ah.

Shaqaalaha dugsiga waxaa lagu aaminay macluumaad aad u muhiim u ah oo ku saabsan ardeyga. Shaqaaluhu waa inay ula dhaqmaan dhammaan macluumaadkan caafimaad iyo ka shakhsiyeed mid xasaasi ah iyo si xushmad badan, aysana la wadaagin waxaan ahayn asal ahaan 'u baahan inay ogaadaan'.

## Macluumaadkee iyo diiwaankee ayaa lagu wareejin karaa dugsiga dawlada Victoria ee ku xigga?

Marka ardeyga laga aqbalo dugsi dawlada Victoria ee kale, dugsiga hadda wuxuu siin karaa macluumaadka caafimaad iyo ka shakhsiyeed ee ardeyga dugsiga ku xiga.

Tani waxay u dhici kartaa si kasta ama dhammaan siyaalahan soo socda:

- hadal ahaan: maamulaha ilaa ka maamule (ama wakiil idman).
- warqad: iyagoo bixinaya diiwaanka ardeyga (oo ay ku jiraan wixii warbixin caafimaad ah) dugsiga ku xigga.
- elektaroonig ahaan: oo ay ku jiraa shaqada wareejinta CASES21; Nidaamka Kiiska Interneetka ee ardeyga (SOCS) iyo/ama iimeyl.

maamulayaasha (ama wakiilada idman) waxaa go'aamiya macluumaadka la siinayo dugsiga ku xigga ee dawlada Victoria oo ku saleysan qaabka 'u baahan inuu ogaado':

*Macluumaadkee baa dugsiga ku xiggaa 'u baahan yahay inuu ogaado' si uu si hagaagsan u waxbaro ama taageero ardeyga,oo u fuliyo waajibaadka sharciga ah ee dugsiga?*

## Qaabka 'U BAAHAN INAAD OGAATID'

### Waajibaadka daryeelka

Waajibaadka dugsiga ee daryeelka ardeyga micnaheedu waa in maamulaha ama hubin kale oo ka tirsan kooxda maamulka ay u baahan yihiin inay ogaadaan wax ku saabsan wax kasta **oo macquul ahna khatar waxyeelo oo la arki karo ee cid kasta sababtoo ah ardeyga dabiicadiisa, iinta, xaaladaha qoyska** ee la xiriira ardeyga.

Saa daraadeed, tusaale, haddii ay jirto khatar muuqata oo macquul ah ee qof uun sababtoo ah ardeygu:

- wuxuu muujinayaa dabeecad dagaal leh
- yahay dhibane, ama xoog sheegato mid sameynaya, waxyeelid ama dabeecad galmood aan habooneyn da' ahaan
- oo leh arimo waxyeelaya nafsadiisa, fiyoobaantiisa, maskaxdiisa

ka dib shaqaaluhu waa inay **u sheegaan maamulaha** (ama xubinta kale ee kooxda hogaanka dugsiga).

Ka dib maamulaha ayaa la wadaagi doonaa macluumaadka khuseeya xubinta kale ee shaqaalaha ah ee dooneysa inay ogaato sababtoo ah waxay la shaqeeyaan , ama kormeeraan, ardeyga. Shaqaaluhu waa inay siiyaan maamulaha macluumaadka ku fila nee khuseeya ee loogu baahan yahay in si ku filan loo fuliyo waajibaadkooda daryeel- si maamuluhu u fuliyo waajibaadkooda daryeel xitaa.

Muhiim ahaan, markay jirto khatar si macquul ah loo arko oo waxyeelo, shaqaaluhu waa inuu macluumaadkaas wax ku qabtaa oo uu la wadaagaa macluumaadka shaqaalaha kale ee u baahan inay ogaadaan', xitaa haddii ardeyga ama waalidku yiraahdo waa inaan macluumaadka la wadaagin.

### Sharciga midab kala sooca

Dugsiga waajibaadkiisu waa inuu ku sameeyo **bedelaad macquul ah** ardeyga iinta leh (iyadoon loo eegaynin inay xaq u leeyihiin iyo in kale sida waafaqsan Barnaamijka ardeyga Iinta leh) micnaheedu waa in macluumaadka khuseeyaa ee ku saabsan ardeyga iinta leh iyo baahidooda waa in lala wadaagaa dhammaan shaqaalaha la shaqeeya ama kormeera ardeygaas.

Tan waxaa looga baahan yahay inay awood u siiso dugsigu inuu gaaro go'aamo war buuxa iyagoo heysta oo ku saabsan isbedelkee baa macquul ah, ka dibna la dhaqan geliyo isbedelada.

Tan waxaa sidoo kale laga yaabaa in loogu baahdo fulinta waajibka daryeel ee ardeyga leh xaalad caafimad ee laga yaabo inuu u baahan yahay daaweyn).

Tan micnaheedu waa in macluumaad khuseeya waa in lala wadaagaa shaqaalaha la shaqeeya ama kormeera ardeygaas, si ay awood ugu siiso inay:

- fahmaan ardeyga iintiisa iyo siday u waxyeesho waxbarashadooda iyo fiyoobaanta maskaxeed iyo bulshaba

- ku dhaqangeliyaan isbedelo macquul ah dugsiga, oo ay ku jirto fahmida dhammaan waxyaalaha lagu talinayo ee ay sameeyeen xirfadlayaasha daaweynaya ardeyga.

Qorshayaasha dugsiga ay khuseyso waxaa raaca shaqaalaha dugsiga markay la hadlayaan waalidka, sida qorshayaasha dabeecada iyo fiyoobida. Gal website ka dugsigaaga wixii qorshayaal khuseeya ah.

Shaqaalaha dugsiga waa la helayaa si ay u bixiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshayaasha dugsiga iyo maamulida macluumaadka shakhsiyeed ama kala xiriir Sarkaalka Arimaha gaarka ah ee DET privacy@edumail.vic.gov.au.